

# Taageerada Su'aalaha la is waydiiyo ee Huteelka Karantiilka ee Alberta

## (Alberta Isolation Hotel Support FAQ)

### Goorma ayaan u baahanahay inaan is gadoomiyo ama is karantiilo? (When do I need to isolate or quarantine?)

- Waxaad leedahay astaamaha xanuunka COVID-19.
- Haddii lagaa helay COVID-19.
- Waxaad xidhiidh dhaw la samaysay qof la xaqiijiyay inuu qabo xanuunka COVID-19.
  - Adigu hadda wax calaamado ah ma lihid laakiin waxaad halis ugu jirtaa inaad bukooto ama aad yeelato natiijooyin caafimaad oo aan wanaagsaneyn maxaa yeelay dadka kale ee gurigaaga ku nool waxay leeyihiin COVID-19 mana awoodid inaad si ammaan ah u joogto guriga.
  - Tusaale ahaa, waxaa laga yaabaa inaad la nooshahay qof qaba xaalad gaar ah oo caafimaad ama laga yaabo inuu yeesho habka difaaca jirka oo liita.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan go'doominta qasabka ah ee Alberta iyo shuruudaha karantiilku waa waxaad ka heli kartaa [halkan](#).

### Waxaan ahay ama la noolahay shaqaale muhiim ah. Ma isticmaali karaa hudheel gooni ah si loo hubiyo in aan amaan ahay? (I am or I live with an essential worker. Can I use an isolation hotel to ensure I am protected?)

- Haa, hoyagani waxaa heli kara shaqaalaha lagama maarmaanka ah ama shaqsiyaadka la deggan shaqaalaha muhiimka ah ee u baahan go'doomin ama hoy gooni ah.

### Maxaan u baahanahay si aan isu gadoomiyo ama is karantiilo? (What do I need in order to isolate or quarantine?)

- Qolka jifka / musqusha ee gaarka loo leeyahay ee guriga ama meel kasta oo kale oo lala joogo goys / saaxiibbo iyo helitaanka cuntada oo aan ku lug lahayn xiriir lala yeesho shaqsiyaadka kale (sida jikada gaarka ah ama cuntada la dhigo albaabka qolkaaga gaarka ah).

### Goorma ayaan u baahanahay inaan isticmaalo Hudheel gooni ah? (When do I need to use an isolation hotel?)

- Markaad u baahan tahay meel gooni ah, oo aadan sidaas ku sameyn karin qolkaaga / musqushaada gaarka ah iyo / ama aadan heli karin cuntada adiga oo aan lala xiriirin shaqsiyaad kale.

### Miyaan u qalma xataa hadii aan haysato dhaqaale yar? (Do I need to qualify as having low income?)

- Maya, ikhtiyaarkan waxaa heli kara qof kasta oo u baahan is go'doon oo aan ku samayn karin si nabadgelyo ah tilmaamahan.

### Qofkee ayaan heli karaa markaan ku jiro hudheelka cidlada ah? (How do I access an isolation hotel?)

- Haddii aad buuxiso shuruudaha sare, waxaad wici kartaa 211 oo codsan kartaa caawimaad si aad u hesho hudheel go'doon ah.

### **Maxaan u baahanahay inaan ku ogaado mudadaan halkaas joogo? (What do I need to know for my stay?)**

- Xusuusnow inaad soo qaadato dawo kugu filan, dhar raaxo leh, waraaqaha musqusha, isgaarsiinta shaqsiyeed iyo aaladaha madadaalada, muraayadaha indhaha, qalabka wax akhriska iyo waxyaabaha kale ee loo baahan yahay kuwaas oo jiri doona muddada go'doominta.
- Waxaad ubaahantahay inaad kusugnaato qolka hoteelka waqti walbo mudada aad joogtid halkaas. Laguuma oggola inaad ka tagto goobta sabab kasta ha noqotee (tusaale ahaan qiiqa ama inaad ka nasato jimicsiga, inaad la kulmto martida, iwm.), Haddii aysan jirin xaalad degdeg ah sida digniinta dabka ama ujeedo caafimaad.

### **Ma dooran karaan Hudheelka aan joogayo? (Do I get to choose what hotel I can stay in?)**

- Maya, Dowladda Alberta waxay qandaraasyo la gashay hoteelo diyaarsan oo awood u leh inay bixiyaan adeegyo aamin ah. Marka AHS ay go'aamiso inaad u baahan tahay hoy ganacsi/lacag ah, waa lagaala soo xiriiri doonaa waxaana lagu siin doonaa cinwaanka iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah ee ku saabsan hudheelka aad ka go'doomi doontid / isku karantiilaysid.

### **Cunto ma la bixinayaa? (Will food be provided?)**

- Cuntada waxa bixinaya hawlwadeenada hudheelka.
- Xayiraadaha cuntada waxaa maamula hawlwadeenada hudheelada ka shaqeeya.

### **Ka waran haddii aan qabo walaacyo caafimaad intaan joogo goobtaas? (What if I have health concerns during my stay?)**

- Baadhitaanka fayoaqabka waxaa dhammeystiri doona kooxaha AHS ee goob kasta waxayna dhici doonaan hal illaa laba maalmood. Baadhitaanadu waxay hubin doonaan inaad fahanto shuruudaha go'doomint ee socda waxayna kaa caawin doonaan / taageeri doonaan wixii arrimo ama walaac ah ee ka dhalan kara.
- Wac 911 haddii aad si aad ah u xanuunsato aadna u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah. Ogeysii iyaga haddii aad qabtid COVID-19.
- Wixii ku saabsan arimaha caafimaadka aan degdegga ah iyo weydiimaha caafimaadka, ka wac Health Link lambarka 811.

### **Ma heli karaa dad isoo booqda ama ma la hadli karaa martida kale ee ku go'doomsan hoteelka? (Can I have visitors or talk to other hotel isolation guests?)**

- Booqasho lama ogola. Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad si aad khadka tooska ah ku booqato qoyskaaga, asxaabtaada iyo kuwa aad jeceshahay halkii aad ka wici lahayd taleefan, wicitaanno fiidiyoow ama barnaamijyada wada sheekaysiga.

### **Ma isticmaali karaa internetka? (Will I have access to internet?)**

- Haa. Hoteellada oo dhan waxaa lagu qalabeeyay adeegyo internet oo bilaash ah inta aad ku sugan tahay.

### **Ma jiraan wax lacag ah oo dheeri ah sida dhigaalka burburka, internetka, baarkinka ama wicitaannada taleefannada? (Are there any additional fees such as damage deposit, internet, parking or phone calls?)**

- Waxaa lagu siin doonaa qol hudheel raaxo leh iyo cuntadaada oo lagu siin doono. Wixii adeeg guud ah ee la imaan lahaa qolka (tusaale ahaan Wi-Fi) waa la daboolayaa inta aad joogto. Mar alla markii aad timaado hudheelka, fadlan ka soo dadka qaabilaada ee hudheelka si aad u ogaato waxa sahayda joogitaankaaga iyo adeegyada kuu noqon doona kharash dheeraad ah.